

Wejiga Dib-u-furidda BPS ee Bilaabanaysa Febraayo 1, 2021

Qodobada ugu Muhiimsan

1. **Maamulaha Guud iyo Guddigu Waxbarashadu waxay rabaan ardayda BPS inay ku soo noqdaan dugsiga** sida ugu dhaqsiiyaha badan isla markaas loo sameeyo qaabka ugu nabdoon oo masuuliyada leh. Waxaan qaadi doonaa talaabooyin aan ku magdhabeyno waxbarashadii luntay. Laakiin ma beddeli karno nolosha iyo cawaaqib xumada caafimaad ee ka dhalan karta isu keenidda deg dega ee degmo magaalo ballaaran oo kala jaad ah.
 - Qorshooyinka ku saleysan iskuulka waxay mudnaanta siin doonaan ardayda ugu baahida badan, Pre-K - 2, iyo ardada fasalka 12aad ku jiri doona Wajiga 1 ee ku noqoshada waxbarida shaqsiyeed.
2. Marka loo eego Agaasimaha Caafimaadka BPS Dr. Dennis Kuo, Madaxa Qaybta Caafimaadka Carruurta & Baxnaaninta ee 'UBMD Pediatrics', fayraska hadda bulshada ku faafaya ayaa maraysa meeshii ugu sarraysay oo si deg deg ah uguna sii xumaanaysa. Dr. Kuo wuxuu kugula talinayaa barashada fog, ugu yaraan ilaa Bisha Febraayo 1, si loo helo isku xirnaansho waxbarasho illaa hal semester ah iyo waqti si buuxda loogu howlgaliyo borotokoollada imtixaanada cusub iyo sidoo kale in laga tallaalo 750 carruur ah MMRV.
3. Maxaa yeelay **BPS waxay horeyba u firfircoonaayeen bishii Maarso** waxayna si caqli ku jirto ugu beddeleen barashada fog keliya marka hore Gobolka New York, faafitaanka ballaaran ee heerarkiisa hore ee fayraska waa laga fogaaday Buffalo. Waxaan hadda ku jirnaa barta go'aan qaadashada isbarbar socota.
4. BPS waxay qaadayaan **ficil si ay wax uga qabtaan cawaaqib xumada xaga bulsho-shucuureed** ee xiritaanka la xiriira Covid-19:
 - Dhammaan ardayda BPS waxay kaqeybqaadayaan **Waqtiga Wareega Shucuur-Bulsheedka** taa macnaheedu yahay in lagu dhameystiro ku warhaynta xag shucuurta bulshada ee maalinlaha ardayga iyo dhisida xirfadaha laqabsashada.
 - Dugsi kasta wuxuu leeyahay **Shaqaalaha Bulshada, Lataliyayaal iyo Cilmu-nafsi yaqaan** kuwaas oo ka taageera ardayda tabashooyinka shucuurta bulshada iyadoo loo marayo adeegyada la-talinta taleefanka.
 - Dugsi kastaa wuxuu kuxiran yahay oo iskaashi wada shaqeyn la leeyahay **bulshada caafimaadka maskaxda** si loo siiyo ku daaweynta-xag teleefoonka caafimaadka maskaxda shaqsiyeed oo la dadajiyo.
5. Waxarashada fog waxay u shaqeyneysaa **sida ugu macquulsan inta suurtagal ah** inta lagu jiro xiritaanka:
 - Guddoomiyaha Waxbarashada **wuxuu u aqoonsaday Degmada** tusaale lagu daydo xaga hirgalinta barashada fog oo lagu fuliyey dhowr iskuul oo BPS ah, waxayna uqeybisay qorshaheena gobolka oo dhan.
 - Xasiloonida shaqaaluhu macnaheedu marwalba waa heer sare, in kooxdeena cajiibaka ee gaarka ah ee waxbarida ay saacadaha ugu badan lashaqeyyaan ardaydooda.

6. **Natiijooyinka kale ee tacliimeed / taageerada** ee Rubuc Sanadeedka 1aad waxaa ka mid ah:

- **Fasalada** afarta maado ee aasaasiga ah (xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada iyo ELA): 76% ee darajooyinka ayaa gudbaya; 18% ee darajooyinka ma aysan dhameystirneyn; 6% ee buundooyinka ma gudbeynin.
- **Heerarka xaadiritaanka** waxaanu la simaneen 5 degmo-dugsiyeed ee waaweyn; oo aan ka fogeyn markaan qaabka shaqsi ahaan nahay. Celcelis ahaan kudhowaad 83% ee fasalada hoose iyo 78% ee ardayda dhigata dugsiga sare.
- Marka aan indha-indhayno ardada fasalka 12aad ee 2021 waxay muujineysaa inaan ku soconno xawaarihii aan kaga badnaan laheyn **heerka qalinjabinta** sanadkii hore oo ah 76.2%.
- Boqolkiiba 97% ee ardayda dhigata dugsiyada BPS waxay isticmaalayaan **qalab BPS ee wax looga barto meelo fog-fog**. (3% kale waxay u badan tahay inay doorteen inay adeegsadaan qalab iyaga leeyihiin)
- Degmadu waxay **hirkalisay iskaashi hal-abuur leh oo heer wada shaqeyn gobol ah** si loo taageero **ku xirnaanta internetka** ee barashada guriga (iyadoo la adeegsanayo hotspots ama adeegga interka ee broadband service) oo aan wax lacag ah ugu fadhiyin qoysaska ardayda ah.